# Siyaasadda

## Shaqaalaha Waaxda L&I ee Adeegyada

## Helidda Luuqadda

| | |
|---|---|
| **Mowduuc Guud:** Adeegyo Maamul | **Lambarka Siyaasadda:** 2.60 |
| **Mowduuca:** | **La soo saaray:** 11 Luulyo, 2016 (waxay beddelaysaa siyaadda ku taariikhaysan 10/12/2015) |
| **Ku dabaqmanta:** Dhammaan shaqaalaha | |
| **Xiriirka:** Adeegyada War-isgaarsiinta iyo Mareegtada | **Sidoo kale eeg:** Tixraacyada iyo Kheyraadyada |

### Bayaanka Siyaasadda

Siyaasada Waaxda Shaqada iyo Warshadaha (L&I) waa in macaamiisha Aqoontooda Luuqadda Af-Ingiriiska ay Xaddidan Tahay (LEP) loo suurageliyo helidda macnaha leh ee waqtiga habboon dhacda ee dhammaan barnaamijyada iyo hawlaha hay'adda. Dhammaan hawlwadeennada waaxda (L&I) waa in ay adeegyada caawimaadda luuqadda oo bilaash ah u fidiyaan macaamiisha LEP ee ay la kulmaan ama mar kasta oo macmiilka LEP uu codsado adeegyada caawimaadda luuqadda. Waaxda L&I waxay xubnaha dadweynaha ku wargelin doontaa in adeegyada caawimaadda luuqadda oo bilaash ah ay heli karaan dhammaan macaamiisha LEP iyo in hay'adda ay adeegyadan u fidin doonto.

### Ujeeddada iyo Awoodda

Siyaasaddan waxay fareysaa dhammaan hawlwadeennada waaxda L&I in ay macaamiisha LEP u suurageliyaan helidda micnaha leh ee adeegyada iyo barnaamijyada hay'adda. Hawlwadeennada waaxda L&I waa in ay xaqiijiyaan in dhammaan macaamiisha ay si taabogal ah u heli karaan adeegyada hay'adda si ay ugu fahmaan xuquuqdooda iyo mas'uuliyadahooga luuqad ay fahmaan. Siyaasaddu waxay dhigaysaa oo ay joogteynaysaa jaangooyada barnaamijyad iyo adeegyada ay bixiso waaxda L&I iyo qandaraaslayaasha ee looga baahan yahay in ay u hoggaansamaan jaangooyada waaxda L&I.

Ujeeddada laga leeyahay siyaasaddan waa in la sameeyo dhabbetuseyaal/tilmaamo wax-ku-ool ah, oo waafaqsan Madaxa VI ee Xeerka Xuquuqda Madaniga ah ee 1964 (Madaxa VI) iyo Qaybta 188 ee Xeerka Maalgelinta Cuddada Shaqaalaha ee 1998 (WIA) iyo xeernidaamyada hirgelintooda, ee loogu talagalay hawlwadeennada hay'adda in ay raacaan marka ay siinayaan adeegyada, ama ay la dhaqmayaan, shakhsiyaadka aqoonta luuqadda Af-Ingiriiska ee xaddidan. Waaxda L&I, sida qaataha caawimaadda maaliyadeed ee federaalka, waxaa laga doonayaa in ay qaado tallaabooyin caqligal ah si ay u xaqiijiso helidda macnaha leh ee barnaamijyadeeda iyo hawlaheeda ee macaamiisha LEP.

Iyadoo helidda macnaha leh had iyo jeerba loo baahan yahay, haddana heerka adeegyada caawimaadda luuqadda ee waaxda L&I ay tahay in ay bixiso waa weyddiin xaqiiqda-gaar u ah oo isku-dheellirays arrimo kala duwan oo ay ku jiraan:

1. Tirada ama saamigalka macaamiisha LEP ee xaqa u leh in loo adeego ama ay suuragal tahay in ay la kulmaan qayb iyo barnaamij kasta;
2. Inta jeer ee ay macaamiisha LEP la soo xiriiraan barnaamij iyo qayb kasta;
3. Dabciga iyo muhiimadda barnaamijka, waxqabadka, ama adeegga uu barnaamijka u fidiyay nolosha dadka; iyo
4. Kheyraadka uu heli karo barnaamijka iyo kharashka.

Haddii aad rabto caawimaadda u adeegidda macaamiisha naafada ah, oo ay ku jiraan macaamiisha naafada ka ah aragga ama maqalka, u noqo Siyaasadda Shaqaalaha ee 3.11.

## Qeexid

Ujeeddooyinka siyaasadda iyo habraacyada la xiriira awgood, qeexiddan soo socota ayaa la adeegsanayaa:

- **Tarjumaad idman**: Shaqaale u shaqeeya Waaxda Shaqada iyo Warshadaha (L&I) oo haya boos shaqo oo loo magacaabay kaas oo ka mas'uul ah tarjumaadda dokumentiyada ku qoran luuqadda lagu tilmaamay tilmaamaha booska shaqo.

- **Tarjume shahaaddo haysta ama la aqoonsan yahay**: Qof u shaqeeya adeeg-bixiye ka soo baxay shuruudaha Waaxda Adeegyada Ganacsi ee bixinta adeegyo tarjumo. Turjumaanka shahaaddada haysta ama la aqoonsan yahay waa in uu ahaadaa mid adeeg u fidiyo waaxda L&I ama u shaqeeya shirkad bixisa adeeg turjumaan oo ay qandaraas la gashey waaxda L&I.

- **Tarjumaan shahaaddo haysta ama la aqoonsan yahay**: Qof u shaqeeya adeeg-bixiye ka soo baxay shuruudaha Waaxda Adeegyada Ganacsi ee bixinta adeegyo tarjumo. Tarjumayaasha waxay soo gudbin karaan oo keliya qaansheegga (biilka) adeegyada ay u qabteen waaxda L&I ee luuqadaha ay tarjumaadeeda aqoonsiga u haystaan.

- **Iibiyaha ama adeeg bixiyaha qandaraaska lala galay**: Qofka, hay'adda ama shirkadda ganacsi ee ay waaxda L&I la gashey qandaraaska bixinta qaddarka iyo nooca adeegyada la codsadey si ay macaamiisha ugu fidiyaan adeegga luuqadda ay doorbidayaan. Xaaladaha qaarkood, adeegyadan waxaa lagu bixin karaa adeeg-bixiye qandaraasyo gobolka oo dhan ah ay la gashey Waaxda Adeegyada Ganacsi ama adeeg-bixiyaha waaxda L&I.

- **Awood dhaqameed**: Habdhaqanno, sifooyin, iyo siyaasado go'an oo u suuragelinaya hay'adda (ama shakhsi) in ay si wax-ku-ool ah oo habboon ugu shaqeyso goobo iyo isdhexgal dhaqameed kala duwan. Abuurista agab dhaqan ahaan waxtar leh waxay u baahan tahay in la ixtiraamo shakhsiyaadka iyo kala duwanaanshaha dhaqameed, iyo isticmaalka luuqad habboon, farriimo, iyo muuqaalo ku habboon bulshada gaarka ah.

- **Luuqadda la doorbidayo ee macmiilka**: Luuqadda uu macmiilka u aqoonsado in ay tahay luuqadda isaga/iyada ay doonayaan in ay hadal ahaan iyo/ama qoraal ahaanba ugu la hadlaan waaxda L&I.

- **Shaqaalaha Laba-luuqadlaha ah ee La Magacaabay**: Hawladeennada waaxda L&I ee haya xil kasta oo mas'uuliyadiisa shaqo ee hadda, loo xilsaaray ay ka mid yihiin isticmaalka fiican ee Ingiriiska qoraal ah iyo/ama afka ah iyo si fiican u aqoonista ku hadalka iyo/ama qorista hal luuqad oo qalaad ama in ka badan, in uu helo mushaarka hawsha labada luuqadood, kana soo baxo tilmaamaha si fiican u aqoonista laba luuqadood/luuqado badan sida uu caddeeyay Xafiiska Shaqada iyo Shaqaalaha (OHR).

- **Tarjumaad luuqad ah**: Dhageysiga farriin ku baxaysa hal luuqad iyo in hadal ahaan loogu beddelo luuqad kale, oo ah hab ilaalinaya ujeeddada iyo macnaha looga gol leeyahay farriinta asalka ah.

- **Adeegyada helidda luuqadda**: Noocyada kala duwan ee adeegyada qoraalka iyo kuwa hadalka ah ee la heli karo si loo bixiyo helidda macnaha leh ee barnaamijyada iyo adeegyada waaxda L&I ee loogu talagalay macaamiisha LEP, oo ay ku jiraan, balse aan ku xaddidnayn, adeegyada turjumaanka shakhsi ahaaneed, adeegyada turjumaanka telefoonka iyo fiidiyowga, tarjumaadda agabka qoraalka ah iyo adeegyada uu bixiyo hawlwadeenka laba-luuqadlaha ee magacaaban.

- **Guddiga Joogtada ah ee Luuqad Helidda**: Guddiga waaxda L&I oo ka kooban wakiillo ka socda dhammaan qaybaha isku dubbaridka ee korjoogteeya hirgelinta Siyaasadda Adeegga Luuqad Helidda iyo bixinta hawlaha kale ee la-talinta iyo la-socoshada la xiriira hawlaha helidda luuqadda hadba sida loogu baahdo.

- **Aqoonta Luuqadda Af-Ingiriiska oo Xaddidan (LEP)**: Macaamiisha aan luuqadda Ingiriiska uga hadlin sida luuqadooda aasaasiga ah kuwaas oo leh awood xaddidan oo ay ku akhriyaan, ugu hadlaan, ku qoraan ama ku fahmaan luuqadda Ingiriiska waxayna xaq u leeyihiin caawimaad luuqadeed oo la xiriirta nooca gaarka ah ee xiriirka, dheefaha, ama adeegga waaxda L&I.

- **Tarjumaadda aragga:** Tarjumiddda afka ah ee qoraal laga beddelayo hal luuqad loona beddelayo luuqad kale, caadi ahaanna isla-markaasi la sameeyo.

- **Luuqadda asalka**: Luuqadda qofka hadlaya ama qoraagga ee qoraal ahaan ama hadal ahaan loo tarjumayo. Tusaale ahaan, haddii dokumenti Af-Ingiriis ah loo tarjumayo Af-Ruush, luuqadda asalka waa Af-Ingiriis.

- **Akhristayaasha/dhageystayaasha la beegsanayo**: Akhristayaasha/dhageystayaasha loogu talagalay in ay adeegsadaan dokumentiga la tarjumay. Ereyada iyo fikradaha qaarkood way adag tahay in loo tarjumo si macne leh iyadoo sabab u ah kala-duwanaansho luuqadeed

ama dhaqan. Xaaladahan, waxaa aad u habboon in dib loo nakh-shadeeyo oo luuqadda dokumentiga la waafajiyo luuqadda Ingiriiska si loo hubiyo in farriinta loogu talagalay ay fahmaan akhristayaasha/dhageystayaasha la beegsanayo ee ku hadla luuqad aan Af-Ingiriis ahayn.

- **Luuqadda la beegsanayo**: Tani waa luuqadda qoraalka ama hadalka loo beddelayo - waa luuqadda dhageystaha ama akhristaha. Tusaale ahaan: Haddii dokumenti Af-Ingiriis ah loo tarjumayo Af-Ruush, luuqadda la beegsanayo waa Af-Ruush.

- **Tarjumo**: Beddelka hadalka qoraalka ah ee laga beddelayo hal luuqad (luuqadda asalka) loona beddelayo luuqad kale (luuqadda la beegsanayo) oo qaab qoraal ah. Tarjumada saxda ah waa mid soo gudbinaysa ujeeddada iyo macnaha aasaasiga ah ee qoraalka asalka ah.

- **Dokumentiyada muhiimka ah**: Dokumentiyada loo arko in ay muhiim u yihiin macmiilka si uu u helo waxqabadyada iyo adeegyada waaxda L&I, ama uu sharciga u baahan yahay. Haddii dokumenti loo arkayo in uu muhiim yahay iyo in kale waxay ku xirnaan doontaa muhiimadda barnaamijka, macluumaadka, xiriirka, ama adeegga ku lugta leh, iyo cawaaqibta ka soo gaari karta macmiilka LEP haddii macluumaadka laga hadlayo aan si sax ah loo gudbin ama waqti ku habboon la gudbin.

## Siyaasad

### A. Bixinta Adeegyada Helidda Luuqadda ee loo fidiyo Macaamiisha Aqoontooda Luuqadda Ingiriiska ay Xaddidan Tahay

Hawlwadeennada waaxda L&I waxay macaamiisha LEP u suurtagelin doonnaan helidda micnaha leh ee adeegyada iyo barnaamijyada L&I.

1. Hawlwadeennada waaxda L&I waxay macaamiisha LEP u suurtagelin doonnaan helidda micnaha leh ee adeegyada iyo barnaamijyada L&I iyagoo si lacag la'aan ah ugu fidinayo adeegyada helidda luuqadda mid ama kuwo badan oo ka mid ah hababkan soo socda:
    a. Bixinta tooska ah ee adeegyada ee shaqaalaha laba luuqadood ama luuqado badan ku hadla ee la magacaabay.
    b. Adeegyada tarjumaanka ee ay bixiyaan turjumaanno shahaaddo haysta oo qandaraas lala galay (shakhsi ahaan ama telefoonka wax ka tarjuma);
    c. Adeegyada tarjumada afka ah ee ay bixiyaan turjumaannada aqoonta leh ee loogu talagalay luuqadaha aan shahaaddadu lahayn; iyo
    d. Tarjumada dokumentiyada qoraalka ah ee ay bixiyaan turjumaannada idman ama la aqoonsan yahay.
2. Marka waaxda L&I lagu wargeliyo in shakhsiga LEP uu qareen metelo, waaxda L&I waxay war-isgaarsiin qoraal ah ku soo diri doontaa gudaha baaxadda metellaadda oo Af-Ingiriis ku qoran oo si gaar ah loo soo marsiinayo qareenka.
3. Hawlwadeennada waaxda L&I waa in aysan adeegsan barnaamijyada ama ablikeeshannada internet-ka ku saleysan in ay ku bixiso tarjumada loogu talagalay macaamiisha LEP.

## B. Ogeysiiska Adeegyada Helidda Luuqadda

Hawlwadeennada waaxda L&I waxay ku wargelin doonnaan macaamiisha LEP helitaanka caawimaadda luuqadeed, oo lacag la'aan ah, iyagoo ku bixinaya ogeysiiska qoraalka ah luuqado aan Af-Ingiriis ahayn oo macaamiisha LEP ay fahmi doonnaan.

1. Ugu yaraan, qoraallada tilmaamaha ah iyo ogeysiisyada adeegyada helidda luuqadda ayaa waxaa lagu dhejin doonnaa goobo la arki karo iyadoo macaamiisha LEP lagu siinayo dhammaan xafiisyada goobta ee waaxda L&I.
2. Ogeysiiska adeegyada helidda luuqadda ayaa sidoo kale lagu bixin doonaa mid ama in ka badan hababkan soo socda: dokumentiyada wacyigelinta, warqadaha telefoonka, wargeysyada maxalliga ah, idaacadaha iyo telefishannada, iyo/ama gaarista ururrada bulshada ka dhisan.

## C. Mas'uuliyadaha Hawlwadeennada Waaxda L&I

1. Aqoonsiga macaamiisha LEP sida ugu dhakhsiyaha badan ee suuragalka ah inta lagu guda jiro xiriirka hore.
2. In ay u diiwaangeliyaan luuqadda uu doorbidayo macaamiisha LEP si waafaqsan shuruudaha diiwaan-haynta barnaamijka. In ay adeegsadaan nidaamyo kayd-xogeed (database) kasta ee habboon kaas oo joogteeya calanka luuqadda qalaad ama habraacyada ama hannaanka kale ee la aqoonsaday si loogu diiwaangeliyo macluumaadkan luuqadda la doorbido.
3. In ay adeegsadaan nidaamyo kayd-xogeed (database) kasta ee habboon kaas oo joogteeya calanka luuqadda qalaad ama habraacyada/hannaanka kale ee la aqoonsaday si loogu diiwaangeliyo macluumaadkan luuqadda la doorbido.
4. In ay ku wargeliyaan macaamiisha LEP xuquuqda ay u leeyihiin in ay helaan adeegyada helidda luuqadda oo si lacag la'aan ah loogu fidinayo.
5. In ay qabanqaabiyaan oo ay u fidiyaan adeegyada helidda luuqadda oo taabogal ah dhammaan macaamiisha LEP.

## D. Mas'uuliyadaha Qaybta Waaxda L&I

1. In ay wakiil ku metelaya u magacaawdo Guddiga Joogtada ah ee Luuqad Helidda;
2. In ay iskaashi ka yeelato diyaarinta iyo hirgelinta habraacyada bixinta adeegyada tarjumaada afka ah iyo midda qoraalka ah ee qaybta iyadoo xaqiijinaysa taageero maamul iyo mid maaliyadeed oo loogu talagalay xilalka iyo kheyraadyada dheeraadka ah ee ku habboon;
3. Hubinta in hawlwadeennada loo tababaray Siyaasadda Adeegyada Helidda Luuqadda, waxay u qoondeyn kartaa kheyraadyada helidda luuqadda ee la heli karo iyo helidda tababar kasta oo kale ee lagama maarmaan ah ee loogu talagalay hawlwadeennada si ay u qabtaan waajibaadyadooda shaqo ee la xiriira LEP.
4. Qaybaha ay ka jiraan la-tacaamulka fool-ka-foolka ah ee dadweynaha, in ay xaqiijiso in warqado luuqaddo badan ku qoran lagu dhejiyo dhammaan goobaha sugitaanka macmiilka waaxda L&I kuwaas oo sharxaya helitaanka, oo bilaash u ah macmiilka, ee adeegyada helidda luuqadda.
5. In ay aqoonsato dokumentiyada muhiimka ah ee loogu talagalay in la tarjumo. Tilmaamaha federaalka waxay waxtar u leeyihiin go'aaminta dokumentiyada

muhiimka ah ee u baahan in la siiyo mudnaanta tarjumaadda oo waxaa laga yaabaa in aanan lagu bixin adeegyada afka ee loo marayo hawlwadeenno laba luuqadle ah ama adeegyo turjumaan. Dokumentiyada muhiimka ah waxaa ka mid ah, balse aan ku xaddidnayn:

a. Dokumentiyada ay tahay in sharci ahaan la bixiyo;
b. Foomamka cabashada, oggolaanshaha, fasaxidda ama ka-dhaafidda;
c. Foomamka xaqsheegashada ama codsiga;
d. Shuruudaha heshiiska ama heshiisyada xalka ah;
e. Warqadaha ama ogeysiisyada ku saabsan yareynta, diidmada, ama joojinta adeegyada ama barnaamijyada ama jawaab uga baahan macmiilka LEP;
f. Ogeysiisyada waqti ahaan xasaasiga ah, oo ay ku jiraan ogeysiiska dhageysiga, su'aal weyddiinta qareennada ee soo socda, ama taariikhaha kama dambeysta ah kale ee la xiriira baaritaan ama dacwad;
g. Foomamka ama agabka qoraalka ah ee la xiriira xuquuqaha shakhsiga;
h. Ogeysiisyada xuquuqaha, shuruudaha, ama mas'uuliyadaha;
i. Ogeysiisyada la xiriira helitaanka adeegyada caawimaadda luuqadda oo bilaash ah oo loogu talagalay shakhsiyaadka LEP; iyo
j. Agabka wacyigelinta ama xogta xambaarsan marka ay jirto ka warqab la'aanta jiritaanka barnaamij gaar ah ayaa waxay si taabogal ah ugu diidi kartaa shakhsiyaadka LEP helidda macnaha leh.

6. Kuddar luuqadda qandaraasyada adeegga si loogu wargeliyo adeeg bixiyeyaasha mas'uuliyadooda ee waafaqsan sharciga federaalka si loo bixiyo ama loo qabanqaabiyo adeegyada luuqadda. Ogow in adeeg bixiyeyaasha qandaraaska kula jira waaxda L&I in ay tahay in ay u hoggaansamaan dhammaan xeernidaamyada (t.a., Madaxa VI ee Xeerka Xuquuqda Madaniga ah ee Mareykanka ee 1964) ee deraalka iyo kuwa gobolka, iyo sidoo kale shuruudaha qandaraaska ee ku saabsan bixinta adeegyada luuqadda;
7. Hubso in xogta la ururiyo oo dib loo eego sannad kasta si loo go'aamiyo isku-qaska habboon ee adeegyada helidda luuqadda ee loo fidinayo macaamiisha LEP oo waafaqsan falanqeynta afarta-cunsur ee looga hadlay Qaybta II.
8. Hubso in warbixinnada iyo cabashooyinka macmiilka ee ka-gaabin kasta ee ay ku kaceen hawlwadeennada waaxda L&I si ay u bixiyaan adeegyada helidda luuqadda in si dhaqso ah wax looga qabto ka-dibna in la raadraaco oo dib-loo-eego si loo aqoonsado horumarinnada laga sameyn karo bixinta adeegyada luuqadda ee qaybta ee loogu talagalay dhammaan macaamiisha.

## E. Adeegyada Luuqadda ee War-isgaarsiinnada Qoraalka ah iyo Kuwa Hadalka ah

Iyadoo ku xiran duruufaha iyo baahiyada war-isgaarsiineed ee macaamiisha LEP, hawlwadeennada waaxda L&I waxay wax ka dhex dooran doonnaan ikhtiyaaradan soo socda markay aqoonsanayaan nooca war-isgaarsiinta qoraalka iyo/ama tan hadalka ah ee lagu adeegsanayo xaalad gaar ah.

Hawlwadeennada waxay eegi karaan dokumentiyada muujinaya habraacyada gaarka ah ee helidda adeegyada tarjumada qoraalka iyo kan hadalka ah ee Xafiiska Agaasimaha, barta intranet-ka ee Kheyraadyada Laba-luuqaadlaha.

1. War-isgaarsiinnada Afka Ah

   a. Haddii macmiilka LEP uusan si toos ah ugu adeegin shaqaalaha laba-luuqadlaha ah ee la magacaabay, hawlwadeennada waaxda L&I wuxuu afka kala hadli doonna macmiilka iyadoo la adeegsanayo turjumaan shahaaddo haysta.
   b. Tarjumada afka ah ee war-isgaarsiinta qoraalka ee Af-Ingiriiska ah ayaa la aqbali karaa, laakiinse macmiilka LEP waa in lagu wargeliyaa in adeegga tarjumaadaha sidoo kale loogu fidin doonno isaga/iyada si bilaash ah.
   c. Hawlwadeenka waaxda L&I waa in uusan u adeegsan turjumaanno ahaan carruurta, xubnaha qoyska ama saaxiibada macmiilka LEP.
2. War-Isgaarsiinnada Qoraalka ah
   a. Hawlwadeennada waxay macaamiisha LEP u fidin doonnaan mid ama ka badan qaababka ee war-Isgaarsiinnada qoraalka ah ee la tarjumey.
      i. War-isgaarsiinta qoraalka ah ee sida buuxda loo tarjumay ama warqadaha ka yimaada waaxda L&I oo ku qoran luuqadda uu macmiilka doorbidayo,
      ii. Warbixin kooban oo laga qoray war-Isgaarsiinnada qoraalka ah ee Af-Ingiriiska ah ama sharraxaad gaaban, oo tilmaamaysa mowduuca iyo muhiimaddiisa iyo taariikho kasta oo kama dambeys ah, oo ku qoran luuqadda la doorbidayo ee macmiilka; ama
      iii. Qoraal ama warqad ku qoran luuqadda la doorbidayo ee macmiilka oo u sheegaysa isaga/iyada sida loola xiriiro waaxda L&I si loo helo caawimaadda fahamka war-isgaarsiinta qoraalka ah ee ay ka helaan waaxda L&I oo Af-Ingiriis ah.
   b. Dokumentiyada muhiimka ah ayaa mudnaan tarjumaan la siiyaa.
   c. Hawlwadeennada waxay kala tashan karaan wakiilka Luuqad Helidda ee qaybtaada caawimaadda go'aaminta habka ugu habboon ee lagu la hadlayo macmiilka LEP.

**F. Hawlwadeennada Tababarka waxay heli doonnaan tababar qayb ka ah geeddi-socodka shaqo ku sii biiridda shaqaalaha cusub.**

Tababarka naqtiinka ah ama gaaban ayaa waxaa loo qaban doonnaa sida uu go'aamiyo Guddiga Joogtada ah ee Luuqad Helidda.

**G. Korjoogteynta**

Guddiga Joogtada ah ee Luuqad Helidda wuxuu si sannadle ah uga korjoogteyn doonnaa uguna qiimeyn doonnaa hirgelinta siyaasaddan iyo hawlaha LEP ee kale wax-ku-oolnimo iyo in adeegyada luuqada loo cusboonaysiiyay sida loo baahan yahay si loo bixiyo macluumaadka ku saabsan dadka LEP ee ku habboon, baahiyadooda caawimaadda luuqadeed, iyo waayo-aragnimadooda waafaqsan siyaasaddan.

**H. Habraaca Cabashada**

Marka macaamiisha ay ka soo warbixiyaan ka gaabinta hawlwadeennada waaxda L&I in ay bixiyaan adeegyada luuqad helidda, mas'uuliyadda koowaad waa bixinta adeegga la codsadey iyo xallinta arrinta in lagu xalliyo heerka ugu

hooseeya ee suuragalka ah.

1. Macaamiisha aaminsan in loo diiday helidda macnaha leh ee adeegyada waaxda L&I oo sabab u ah in aysan lahayn aqoon luuqadda Ingiriiska ah waa in lagu wargeliyaa in ay xaq u leeyihiin in ay cabasho u soo gudbiyaan waaxda L&I ama Wasaaradda Shaqada iyo Shaqaalaha ee Mareykanka, Xarunta Xuquuqda Madaniga ah. Cabashooyinka loo soo gudbiyay waaxda L&I waxaa loo diri doonnaa Xafiiska Hubinta (Baarista) Gudaha iyo Xuquuaha Madaniga ah si loogu sameeyo dib-u-eegis madax-bannaan iyo, haddii ay lagama maarmaan tahay, baaris waafaqsan awoodda Agaasime Ku-xigeenka Xafiiska Hubinta (Baarista) Gudaha iyo Xuquuqaha Madaniga ah.